Magangelyo-doonka iyo qaxootiga ka diiwaangashan Sanca hadda waxay ka cusbooneysiin karaan dukumeentiyadooda **Xafiiska Arrimaha Qaxootiga** ee Sanca. Haysashada dukumeenti cusub oo magangalyo-doon/qaxooti ah ayaa muhiim u ah **ilaaladaada** ka magangalyo-doon ama qaxooti ahaan Yemen dhexdeeda, waxayna kuu fududaynaysaa **helitaanka adeegyada** ay bixiyaan UNHCR iyo masuuliyiinta qaranku.

Wixii ka dambeeya **15 Oktoobar 2023**, UNHCR ma siin doonto adeegyo shakhsiyaadka haysta dukumeenti dhacay. Shakhsiyaadka tagaya UNHCR ama la-hawlgalayaasheeda taariikhdan ka dib waxay u baahan doonaan inay marka hore ka cusboonaysiiyaan dukumeentiyadooda Xafiiska Arrimaha Qaxootiga, ka hor inta aan la caawin.

Xarunta Diiwaangelinta ee Xafiiska Arrimaha Qaxootiga,
Daaradda Hay'adda Socdaalka, Baasaboorada iyo Jinsiyadaha, Degmada Sabciin, Waddada Khawlaan, Magaalada Sanca, Yemen

Dhammaan kaalmooyinku iyo adeegyadu waa LACAG LA'AAN.

Si aad uga warbixiso anshax-xumada, fadlan la xidhiidh:
Khadka Ilaalada UNHCR: +967 71 222 5038
Iimeelka Ilaalada UNHCR: yemsaprt@unhcr.org
Xafiiska Kormeeraha Guud: inspector@unhcr.org

UNHCR
The UN Refugee Agency

HELITAANKA DUKUMENTIYADA IYO ADEEGYADA EE MAGANGELYO-DOONKA IYO QAXOOTIGA KA DIIWANGASHAN SANCA - YAMAN

UNHCR
The UN Refugee Agency

Waxaan doorbidayaa in aan si toos ah ugu cusboonaysiiyo dukumeentigeyga UNHCR, ee arrinkan sideen u samayn karaa?
Nasiib darro waxaa ah in UNHCR ay bixin ama cusboonaysiin dukumeentiyada magangalyo-doonka/qaxootiga Yemen dhexdeeda. UNHCR waxay si adag ugu dhiirigelinaysaa dhammaan magangelyo-doonka iyo qaxootiga inay aadaan Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si ay u cusboonaysiiyaan dukumeentiyadooda. Haddii aad weli haysato shahaadadii hore ee magangelyo-doon/qaxooti kadib **15 Oktoobar 2023**, ma awoodi doontid inaad hesho adeegyo iyo gargaar.

Joojinta adeegyadu ma saameyn doontaa helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka?
Joojintan adeegyada laga joojinayo shakhsiyaadka haysta dukumeenti dhacay wixii ka dambeeya **15 Oktoobar 2023** waxay la xidhiidhaa dhammaan adeegyada ay bixiso UNHCR iyo la-hawlgalayaasheedu.

Haddii Xafiiska Arrimaha Qaxootigu uu dib u cusboonaysiiyo dukumeentigayga, ma la'ii samayn doonaa dib-u-dejin?
Cusboonaysiinta dukumeentiyadaada iyo kuwa qoyskaagu xaq kuuma siinayaan dib u dajin. Dib-u-dejintu ma ahan xaq, waxaana heli kara oo kaliya qayb aad u yar oo ka mid ah qaxootiga sababtoo ah tirada meelaha dib-u-dejinta ee la heli karo sannad kasta ayaa aad u yar. Waxaa muhiim ah in aad adiga iyo qoyskaagu cusboonaysiisataan dukumeentiyadiina si aad u sii heshaan adeegyada iyo gargaarka ay bixiyaan UNHCR iyo la-hawlgalayaasheedu.

Ma awoodo inaan aado Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si aan u cusboonaysiiyo kaarkayga. UNHCR ma iga caawin kartaa kharashka gaadiidka?
Nasiib darro waxaa ah in UNHCR ay awoodin inay bixiso kharashka gaadiidka shakhsiyeed, ama kharashyada kale ee la xidhiidha habsocodka cusboonaysiinta dukumeentiga.

Waa maxay habsocodka lagu cusboonaysiinayo dukumeentiga magangalyo-doonka/qaxootiga?
Si aad u cusboonaysiiso dukumeentiga magangelyo-doonka/qaxootiga, waxaad u baahan doontaa inaad shakhsi ahaan u aado Xafiiska Arrimaha Qaxootiga adigoo wata dukumeentiga magangalyo-doonka/qaxootiga ee asalka ah (dhacay). Dhammaan xubnaha qoyskaagu waa inay shakhsi ahaan kuu raacaan. Waxaa lagama maarmaan ah in dhammaan xubnaha qoyskaagu si shakhsi ahaan ah ay u qaataan dukumeentiyadooda.

Haddii aad carruur leedahay, waa inaad sidoo kale keentaa shahaadooyinkooda dhalashada, iyo/ama dukumeentiyada kale ee aqoonsiga ee qoyska, sida baasaboorka dhacay.

Xafiiska Arrimaha Qaxootiga waxaa lagugu siin doonaa laba nooc oo foom ah:

- **Foomka aqoonsiga:** ee loo baahanyahay in uu buuxiyo odayga xaafaddu iyo saldhigga booliska ee u dhaw meesha aad deggantahay, si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga;
- **Foomka Caafimaadka:** waxaa lagu siin doonaa foomkan waxaana laguu gudbin doonaa Shaybaadhka Caafimaadka Dadweynaha Dhexe ee Qaranka si aad u marto baadhis dhiig oo khasab ah. Foomka waxaa lagu buuxin doonaa natiijada baaritaanka waxaana shaabadayn doona Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha Dhexe ee Qaranka. Fadlan la soco in baaritaan kasta oo caafimaad oo lagama maarmaan u ah cusboonaysiinta dukumeentiga oo lagu sameeyo Shaybaadhka Caafimaadka Dadweynaha Dhexe ee Qaranka uu yahay mid lacag la'aan ah.

Markaad buuxiso foomamkan, waa inaad u gudbisaa Xafiiska Arrimaha Qaxootiga, ka dibna, Xafiiska Arrimaha Qaxootiga ayaa ku siin doona warqad ballan ah si loo xaddido wakhtiga ballanta cusboonaysiinta dukumeentigaaga.

Waxaan lumiyay dukumeentigayga magangalyo-doonka/qaxootiga. Sideen ku heli karaa beddelkiisa?
Haddii aad lumiso dukumeentigaaga, waxaad ka codsan kartaa dukumeenti beddel ah Xafiiska Arrimaha Qaxootiga. Si dukumentiga beddelka ah loo soo saaro, waa inaad marka hore:

- Ku xayaysiisaa lumitaanka dukumeentigaaga joornaalka maxalliga, si aad u xaqiijiso inaad lumisay dukumeentigaaga;
- Tagtaa saldhigga booliiska ee kuugu dhow oo aad ku wargelisaa in uu kaa lumay aqoonsigaagii, isla markaasina ka codsata ogaysiis boliis oo xaqiijinaya in aad ka warbixisay aqoonsigaagu in uu lumay.

Marka aad labadood soo dhammayso, waxaad markaas la xiriiri kartaa Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si aad u codsato dukumeenti beddel ah, adiga oo hubinaya inaad keentay dukumeentiyada la xiriira ee sida (koobiga joornaalka iyo ogeysiiska booliiska). Fadlan hubi inaad sidoo kale ogeysiiso UNHCR lumitaanka aqoonsigaaga si loo xaddido isticmaalka dukumeentigaaga lumay.

Uma tagi karo Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si aan u cusboonaysiiyo dukumeentigayga sababtoo ah waxaan qabaa naafo/xaalad caafimaad oo saamaynaysa dhaqdhaqaaqayga, ee sideen u cusbooneysiin karaa dukumeentigayga magangalyo-doonka/qaxootiga?
Marka laga hadlaayo tagitaanka Xafiiska Arrimaha Qaxootiga, shakhsiyaadka leh caqabado la taaban karo oo la xidhiidha da'da, dhaqdhaqaaqa, ama cillad kale oo la taaban karo, waa inay la xiriiraan UNHCR iyaga oo u maraya habka Cabashada iyo Jawaab celinta si ay u sharaxaan xaaladooda. Xaaladaha qaarkood, UNHCR waxay awood u yeelan doontaa inay la xiriirto Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si ay u diyaariso booqasho guri, halka xaaladaha kale ay UNHCR codsan karto in la-hawlgalaheedu uu taageero shaqsiga loo baahanyahay in uu aado Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si loo diiwaangeliyo.

Waxaa la'i siiyay bay ahayd warqad gudbin ah oo uu soo saaray Xafiiska Arrimaha Qaxootigu, ee ma heli karaa dukumeenti magangalyo-doon ah/qaxooti ah?
Habsocodka lagu bedelayo warqadaha gudbinta ee la siiyay magangalyo-doonka/qaxootiga ayaa socda. Shakhsiyaadka xaalkoogu caynkan oo kale uu yahay waxaa lagu dhiirigelinayaa inay aadaan Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si ay u codsadaan in warqadooda gudbinta loogu beddelo dukumeentiga magangalyo-doonka/qaxootiga ah ee ansaxa ah.

Waxa aan hore u codsaday ogolaanshaha degenaanshaha, laakiin hadda ma awoodo in aan iska dhiibo kharashaadka dib u cusboonaysiinta ee sharciga degenaanshiyaha. Si kastaba ha ahaatee, markii aan tagay Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si aan u cusboonaysiiyo kaarka magangalyo-doonka/qaxootiga, waxay iga codsadeen in aan bixiyo lacagta si aan u cusboonaysiiyo dukumeentiga magangalyo-doonka? Mana awoodo inaan bixiyo kharashka, ee maxaan sameeyaa?
UNHCR waxa ay sii waddaa in ay kala hadasho xaalada shaqsiyaadka lagu leeyahay lacagaha kharashka daganaanshaha Xafiiska Arrimaha Qaxootiga, iyo u doodista in xal loo helo. Nasiib darro waxaa ah, wakhtigan xaadirka ah, in aynu awoodin inaan xallino kiisaskan.

Waxaan cusbooneysiiyay dukumeentigeyga, laakiin waxaa ku jira qalad dukumeentiga la'i siiyay, ee ma codsan karaa in la saxo/wax laga beddelo?
Haa, haddii uu khalad ama khalad higaada ku jiro dukumeentiga la soo saaray, waa inaad ku noqotaa Xafiiska Arrimaha Qaxootiga oo aad codsato in la saxo. Waa muhiim in aad la timaado dukumeenti rasmi ah oo uu ku qoranyahay macluumaadka saxda ah, si Xafiiska Arrimaha Qaxootigu uu u tixraaco marka la saxayo.